CUSBITAALKA CARRUURTA EE MERCY
SIYAASADDA MAAMULKA

CINWAANKA: Gargaar Maaliyadeed
DHAQANGALEY: 02/96
TAARIIKHDA DIB LOOGU NOQDEY:10/98, 5/04, 10/04, 07/07, 2/11, 8/13, 6/16, 7/17, 12/17
DIB LOO EEGAY IYADA OO AAN WAX ISBEDDELO AH LAGU SAMEYN: 3/99
HAWLGAB:

UJEEDDADA: Xaqiijinta in gargaar maaliyadeed ay helaan dhammaan Dhinacyada Mas'uulka ah ee u qalma kuwaas oo aan ka soo bixi karin Mas'uuliyadooda Maaliyadeed ee adeegyada caafimaad ee uu ku soo dalacey Cusbitaalka Children's Mercy (*The Children's Mercy Hospital*) ("Cusbitaal").

GOOBTA/AAGGA: Cusbitaalka Children's Mercy, Cusbitaalka Children's Mercy ee Kansas iyo dhammaan goobaha kale.

WAAXDA KA MAS'UULKA AH MAAREYNTA SIYAASADDA IYO FULINTA: Waaxda bukaanka

BAYAANKA SIYAASADDA:
La-talin siyaasadeed iyo gargaar ayaa la siiyaa Dhinacyada Mas'uulka ah ee aan awoodin in ay si dhammeystiran u buuxiyaan Mas'uuliyadooda Maaliyadeed ee Adeegyada U-qalma halka Dhinacyada Mas'uulka ah ee noocaas ah ay awoodaan in ay diiwaangeliyaan baahida maaliyadeed iyada oo la raacayo siyaasaddan.

I. **Aasaaska U-qalmitaanka ee Gargaarka Maaliyadeed**

A. **Degenaansho:** Si uu ugu qalmo gargaarka maaliyadeed, bukaanka ama Dhinaca Mas'uulka ah waa in uu deggan yahay gobolka Missouri ama Kansas uuna ka haysto degenaansho la cadeeyey gobolada Missouri ama Kansas muddo hal sanno ah ka hor codsiga gargaarka/kaalmada. Bukaanada caalamiga ah waxaa loo dirayaa Waaxda Adeegyada Caalamiga ah iyada oo la eegayo Barnaamijka Bukaanka Caalamiga ah iyo Daaweynta La Xulan Karo ee Loogu Talogalay siyaasadda Bukaanada Da'yarta ah ee Aan Muwaadiniinta Ahayn.

1. La-taliyeyaasha maaliyadeed waxay siin karaan gargaar maaliyadeed bukaanada deggan dibadda gobolada Missouri iyo Kansas taariikh (taariikho) si gaar ah loo aqoonsaday adeeg kaliya marka bukaanada noocaas ahi ay leeyihiin bilowga jirro daran, oo aan la qorsheyn, bukaankana ama Dhinaca Mas'uulka ah uu ka soo baxo dhammaan gargaarka maaliyadeed kale ee loo baahan yahay iyada oo la hoostagayo Siyaasaddan.

B. **Dhaqaale Aan Awooddin:** Dhinacyada Mas'uulka ah waxaa loo tixgeliyay in ay Dhaqaale Ahaan Aan Awooddin ayna u-qalmaan 100% gargaar maaliyadeed haddii Cidda/Qofka Mas'uulka ahi uu leeyahay Dakhli Qoys gaaraya ama ka yar 300% ee Tilmaaaha Saboolnimada ah sida lagu hagaajiyey weynaanta qoyska.

C. **Da'da:** Dhammaan bukaanada, iyada oo aan loo eegayn da'dooda, waxay u-qalmaan in ay codsadaan gargaar maaliyadeed intiiba bukaanka hadda uu u qaadanayo daryeel sida bukaan-jiifka Cusbitaalka ama uu raacayo qorshaha daaweynta bukaan-socodka cusbitaalka ee hadda ah.

D. **Barnaamijyada La Heli Karo:** Dhinacyada Mas'uulka ah waa in ay dhammeeyaan dhammaan doorashooyinka kale ee ilaha maaliyadeed ee laga yaabo in ay u-qalmaan, oo ay ka

mid tahay Medicaid iyo caynsanaan dhinac saddexaad kale (“Barnaamijyada La Heli Karo”), ka hor inta aysan u-qalmin gargaar maaliyadeed. Cusbitaalka wuxuu xaq u leeyahay in uu xaqiijiyo in bukaan uusan u-qalmin Barnaamijyada La Heli Karo, oo ay ka mid yihiin, xaddidaad la'aan, diidmo qoran (ama diidmo afka ah oo uu lasocdo dokumeenti qoran) ee laga helo Barnaamijyada La Heli Karo ee la adeegsan karo.

E. **Caynsanaanka Ka Baxsan Shabakada:** Bukaanada haysta caynsanaan caymis waxaa lagu dhiirrigelinayaa in ay ka helaan adeegyadooda shabakada gudaheeda ama in ay sugaan ka-reebnaanta ka-baxsan-shabakada marka la aqoonsado (haddii ka-reebnaanta uu bixiyo qorshe caymis oo loogu talogalay adeegyada loo baahan yahay). Bukaanada ka hela adeegyo Cusbitaalka kuwaas oo leh qorshe caymis ee aan ku jirin Cusbitaalka shabakada caynsanaanta uma qalmaan gargaarka maaliyadeed ee adeegyadaas.

F. **Hantida Lacageed:** Hantida Lacageed waxaa lagu tixgelin doonaa hannaanka codsiga. Dhinaca Mas’uulka ah oo sida kale ka soo bixi kara shuruudaha gargaarka maaliyadeed balse haysta Hanti Lacageed oo le'eg ama ka badan $100,00 uma qalma gargaar maaliyadeed.

G. **Caafimaad Aan Awooddin:** Dhinacyada Ka Mas’uulka ah ee leh Dakhli Guri oo ka badan 300% ee Tilmaamaha Saboolnimada (sida lagu hagaajiyey weynaanta qoyska) oona galey baaqi xisaabeed oo aan u-qalmin maaliyadda laga helo Barnaamijyada oo kabadan 25% qarashaadka guriga soogala ayaa loo tixgelin karaa kuwo Caafimaad Ahaan Aan Awooddin siyaasadaan dhexdeeda. Qaddarka Mas’uuliyadda Maaliyadeed ee Dhinacyada Ka Mas’uulka ah ee ka badan 25% ee Dakhliga Guriga ayaa lasiin karaa 100% gargaar maaliyadeed. Mas’uuliyadda Maaliyadeed ee ka yar ama le’eg 25% ee Dakhliga Qoyska waxay sii ahaaneysaa mas’uuliyadda Dhinaca Mas’uulka ah cadadkeeduna usan kabadnayn qarashaadka guud ee lzaguso qorto (AGB) sida kucad lifaaqa C.

H. **Farmashiye Tafaariiq:** Gargaarka maaliyadeed ee daawada farmashiyaha tafaariiqda waxaa loo heli karaa Dhinacyada Mas’uulka ah haddii ay ka soo baxaan aasaaska gargaarka maaliyadeed ee lagu dejiyey Siyaasaddan. Gargaarka maaliyadeed ee farmashiyaha tafaariiqda waxaa kaliya la bixiyaa iyada oo loo marayo farmashiyeyaasha bukaan-socodka Cusbitaalka.

   i. Dhinaca Mas’uulka ah waa in uu dhammeystiro codsiyada loogu talogalay barnaamijyada bixiyaha u-qalma si uu dhammeeyo dhammaan doorashooyinka caynsanaanta ka hor inta uusan helin gargaarka maaliyadeed ee loogu talogalay farmashiyaha tafaariiqda.
   ii. Dib-u buuxinta daawooyinka sii-socda ee loogu talogalay dadka aan degaanka ahayn ee gobolada Missouri iyo Kansas ma cayminayo gargaar maaliyadeed.
   iii. Codsi kasta ee gargaarka maaliyadeed ee farmashiyaha tafaariiqda waa in uu dib-u eego La-taliyaha Maaliyadda ee Cusbitaalka.

I. **U-qalmitaanka Samafalka Loo Qaateenka ah:** Xaaladaha La-taliyaha Maaliyadeed uu ka sameynaya go’aaminta macquulka ah ee ah in Cidda Mas'uulka ah loo qaadanayo in uu u qalmo gargaarka maaliyadeed inkasta oo hannaanka codsiga caadiga ah aan la dhammeystiri karin iyada oo sabab u ah musiibo ama xaalado kale oo dhimid ah, La-taliyaha Maaliyadeed wuxuu sameyn karaa go'aan maamul ee Cidda Mas'uulka ah ugu qalmi doono gargaarka maaliyadeed xataa haddii dhammaan’ macluumaadka loo baahan yahay aan lagu bixin codsiga. Abaalmarin kasta waxay ansax u noqon doontaa kaliya daaweynta halka-mar ah ee la bixiyey taariikhda(taariikhaha) ee adeegga sida gaarka ah loo aqoonsadey ama baaqigga hadda ee Cidda Mas’uulka ah. La-taliyeyaasha Maaliyadeed waxay mas’uul ka noqon doonaan ururinta macluumaadka ugu badan ee suurtagalka ah si ay u taageeraan dhammaan go’aannada u-qalmitaanka loo qaateenka ah, oo ay ka mid yihiin Codsiyada iyo dokumeentiga dheeraadka ah sida lagu tixraacay hoos ee Qaybta III iyo IIIA.-IIIB, ilaa xeerka

macluumaadka noocaas ah lagu heli karo. Kaalmada maaliyadeed laguma abaalmarinayo daryeelka socda soo-gudbin la'aanta dokumeentiga macquulka ah ee Cidda Mas'uulka ah. Cusbitaalka wuxuu adeegsan karaa qaabayn la saadaaliyo si loo aqoonsado waalidiinta/Dhinacyada Ka Mas'uulka ah ee laga yaabo in ay u-qalmaan gargaar maaliyadeed. Bukaanka/Dhinaca Mas'uulka ah waa loo arki karaa in uu u-qalmo gargaar maaliyadeed iyada oo lagu saleynayo xaaladaha nolosha shaqsiga ee ka mid noqon kara:

i. Hadda la joogo u-qalma habab la tijaabiyey ee ah barnaamijka gargaarka dowladda kaas oo ku saleeya u-qalmitaanka dakhliga qoyska. Barnaamijyada noocaas ah waxaa ka mid noqon kara balse aan ku koobnayn barnaamijyada Dumarka, Ilmaha Yaryar iyo Carruurta (WIC), u-qalmitaanaka kaarka cuntada (food stamp) iyo barnaamijyada qadada dugsiga ee la kabo;
ii. Helitaanka daryeel lacag la'aan ah oo laga helo bukaan-eegtada bulshada taas oo ku saleysan u-qalmitaanka adeegyada dakhliga qoyska;
iii. Sheegidda in ay guri la'aan yihiin iyo cinwaanka bukaanka uu yahay hoy dadka guri la'aanta degaan oo la garanayo iyo in aysan jirin caddayn lid ku ah;
iv. Guryaynta la kabo/dakhliga yar waxaa loo bixiyaa cinwaan ansax ah ahaan
v. Ku dhawaaqidda cayrtoobid sannadkii hore; ama
vi. Natiijooyinka qaabaynta la saadaaliyo oo tilmaamaya awoodid la'aanta bixinta lacagta.

J. **Awood:** La-taliyeyaasha Maaliyadeed waxay leeyihiin awood ay ku siinayaan abaalmarinta gargaarka maaliyadeed shaqsiyaadka ka soo baxaya aasaaska lagu qoray liiska I.A – I.I.

II. Guddiga Gargaarka Maaliyadeed

Cusbitaalka wuxuu dhisayaa oo suurtagalinayaa Guddiga Gargaarka Maaliyeed ("Guddiga"). Guddigan wuxuu noqonayaa koox qaybo badan ah oo ka kooban wakiilo ka socda Cusbitaalka iyo Shaqaalaha Caafimaadka. Mas'uuliyadda guddiga waxaa ka mid ah oo aan ku koobnayn dib-u eegidda rafcaanada ee ka dhasha codsiga gargaarka maaliyadeed ee la diiday ee aan ka soo bixin aasaaska I.A. – I.I. Faah-faahinta xubinnimada dheeraadka ah iyo mas'uuliyadaha waxaa lagu faah-faahiyey Lifaaqa B.

III. Hannaanka Codsiga iyo Go'aaminta

Cusbitaalka wuxuu adeegsadaa hannaan codsi oo loogu talogalay go'aaminta u-qalmitaanka gargaarka maaliyadeed. Si loogu tixgelito gargaarka maaliyadeed, codsiga waa in uu dhammeystiro Cidda Mas'uulka ah waana in uu u soo gudbiyo La-taliyaha Maaliyadeed ee Cusbitaalka iyada oo ay la socdaan dokumeentiga loo baahan yahay sida lagu sharxay III.A. iyo III.B.

Si aad ula xiriirto La-taliyaha Maaliyadeed si aad u soo gudbiso codsiga ama su'aalo kasta oo kale:

- Iimayl admfc@cmh.edu
- Telefoon: (816) 234-3567 | Fakis: (816) 302-9907
- Booqo La-taliye Maaliyadeed oo joogo mid ka mid ah goobahan soo socda:

Children's Mercy Adele Hall Campus
2401 Gillham Rd, Kansas City, MO 64108, Dabaqa dhulka miiska hore ee Gelida Bukaanka

Isniin – Jimco 7 subaxnimo - 7 fiidnimo
Sabti – Axad 7 subaxnimo - 5 galabnimo

Children's Mercy Hospital Kansas, Dabaqa 1aad miiska hore ee Gelida Bukaanka
5808 W 110th, Overland Park, KS
Isniin – Jimco 8 subaxnimo - 4:30 galabnimo

Children’s Mercy Broadway, dabaqa dhulka loobiga miiska ee Gelida Bukaanka
3101 Broadway Blvd, Kansas City, MO 64111
Isniin – Jimco 830 subaxnimo. – 5:00 galabnimo

Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan barnaamijka Gargaarka Maaliyadeed ee Cusbitaalka Children's Mercy, oo ay ka mid yihiin siyaasadda Gargaarka Maaliyadeed iyo foomka codsiga Gargaarka Maaliyadeed codsidayaasha waxay:

- ku heli karaan nuqul lacag la’aan ah iimaylka marka la codsado
- ka codsan karaan foomam ama siyaasad xarun Children’s Mercy kasta shaqaale gelida bukaanka AMA
- ka heli karaan siyaasadda iyo foomka mareegtada http://www.childrensmercy.org/financialcounseling/

Gargaarka maaliyadeed lama bixinayo haddii hannaanka codsiga la dhammeystiro mooyaane marka laga reebo duruufaha aan caadiga ahayn ee lagu sharxey Siyaasaddan (sida ka soo bixidda aasaaska u-qalmitaanka loo qaateenka ah ee I.I). Dhinacyada Mas’uulka waa in ay ku wargeliyaan La-taliye Maaliyadeed isbeddel kasta oo kudhaca xaalkooda maaliyadeed soddon (30) maalmood gudahooda ee isbeddelka noocaas ah. Dhammaan macluumaadka la xiriira codsiga waxaa laga dhigayaa qarsoodi. Dhammaan dokumeentiga iyo go'aanada go'aaminta waxaa lagu haynayaa Gelida Bukaanka iyada oo la eegayo Siyaasadda Haynta Diiwaanada iyo Maareynta.

A. **Xaqiijinta Dakhliga:** Dokumeenti lagu xaqiijinayo macluumaadka Dakhliga Qoyska ee lagu tilmaamay foomka codsiga waa in loo bixiyo sida qayb ka mid ah codsiga. Dokumeentiga noocaas ah waxaa ka mid noqon kara:
   - gummadyada jeegga mushaarka (saddexdii bilood ee ugu dambeeyay);
   - canshuur-celinta dowladda dhexe ee IRS (sannadkii ugu dambeeyay);
   - bayaanka ka heynta ee W-2;
   - waraaqaha gargaarka waxbarasho;
   - bayaanada gargaarka dadweynaha;
   - foomamka oggolaanaya ama diidaya u-qalmitaanka ee magdhowga shaqo la’aanta ama magdhowga shaqaalaha;
   - bayaanno qoran oo laga helay loo-shaqeeyeyaal ama hay'adaha daryeelka bulshada oo xaqiijinaya magdhowga ama abaalmarinta lacagta ah ee loogu talogalay gargaarka dadweynaha;
   - xaqiijinta caynsanaanta Medicaid ee hadda ah;
   - caddaynta dakhliga kale sida SSA (Maamulka Adeegga Bulshada) ee SSI, lacagaha la siiyo xaaska la furey, ama kaalmada carruurta;
   - dokumeentiga nooc kasta oo kale ee ah dakhliga aan ahayn canshuur-celinta dakhliga hadda ah;
   - diiwaanka hantida lacagta ah ee bayaanada bankiga; sida qorsheyaasha hawlgabnimada, dhismeyaasha, gawaarida, iyo dhulka looguma tixgelinayo sida hanti lacageed hannaanka codsiga; iyo
   - loogu talogalay qoysaska aan lahayn wax dakhli ah, bayaan taariikh ku qoran oo saxiixan ee ah cidda bixiso cuntada iyo hoyga.

1. Cidda Mas'uulka ah waa in ay kusoo gudbiso dhammaan dokumeentiga loo baahan yahay ee taageeraya xaqiijinta dakhliga 30 maalmood gudahooda ee soo gudbinta codsiga gargaarka maaliyadeed. 30 maalmood kadib la'aanta dokumeenti taageeraya oo dhammeystiran, codsiga waa la xirayaa iyada oo aan la xaqiijin go'aaminta u-qalmitaanka.

B. **<u>Caddeynta Degganaanshaha</u>:** Dokumeentiga caddeynaya degganaanshaha lagu tilmaamay foomka codsiga waa in loo bixiyo sida qayb ka mid ah codsiga. Dokumeentiyada caddeynta deggenaanshaha waxaa ka mid noqon kara kuwan soo socda:

- Shatiga darawalka ee ay dowladdu bixiso
- Biilka korontada, biyaha iyo gaaska oo dhowaan ah
- Canshuur celinta dhammeystiran ee sannadkii ugu dambeeyay
- Gummadka jeegga mushaarka ee dhowaan ah

Sawir lagu aqoonsanayo Cidda Mas'uulka ah ayaa loogu baahan yahay codsiga gargaarka maaliyadeed. Muwaadiniinta aan Mareykanka u dhallan, dokumeenti aqoonsi oo ah shahaado dhallasho, ama kaarka deggenaanshaha joogtada ah ayaa la oggolaan doonnaa.

C. **<u>Go'aaminta:</u>** La-taliye Maaliyadeed ayaa socodsiinaya hawsha codsiga gargaarka maaliyadeed kow-iyo-labaatan (21) maalmood ee laga joogo helitaanka dhammaan macluumaadka loo baahan yahay. Si codsiga ay dib-u eegis ugu sameeyaan guddi, wargelinta ee go'aaminta ayaa lagu bixinayaa qoraal ahaan kow-iyo-labaatan (21) maalmood gudahooda ee laga joogo go'aanka Guddiga. Haddii aasaaska u-qalmitaanka oo dhammeystiran laga soo baxo, go'aamin ayaa la gaari karaa ilaa oo ay ku jirto 100% daryeelka lacag dhimista lagu sameeyay ee loogu talogalay adeegyada Cusbitaalka ee u-qalma inta lagu guda jiro waqtiga xaddidan ee la cayimay sida lagu qeexay III.C.4.

1. Oggolaansho: Waraaq ka hadleysa oggolaanshaha gargaarka maaliyadeed iyo muddada u-qalmitaanka ee la adeegsan karo ayaa loo dirayaa Cidda Mas'uulka ah.

2. Diidmo: Haday dhacdo in Cusbitaalka uu go'aamiyo in Cidda Mas'uulka ah aysan u-qalmin gargaarka maaliyadeed, diidmo qoran ayaa lagu siinayaa Cidda Mas'uulka ah gudaha isla waqtiga kow-iyo-labaatanka (21) maalmood waxaana ka mid noqonaya sababta(sababaha) diidmada, taariikhda go'aanka, iyo tilmaamaha rafcaanka ama dib-u tixgelinta.

3. Rafcaano: Cidda Mas'uulka ah wuxuu rafcaan ka qaadan karaa go'aaminta u-qalmitaanka gargaarka maaliyadeed asaga oo bixinaya macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Dakhliga Qoyska, weynaanta ama tirada qoyska, ama Caafimaad ahaan Aan Awoodin Cusbitaalka sodon (30) maalmood gudahooda ee laga soo bilaabo helitaanka ogeysiiska.Dhammaan rafcaanada go'aanada ee uu gaaro La-taliyaha Maaliyadeed waxaa dib-u eegaya Guddiga. Rafcaan kasta ee go'aanka guddiga waxaa loo gudbinayaa Madaxweyne Ku-xigeenka Fulinta si uu uga fiirsado. Haddii natiijooyinka rafcaanku ay noqdaan xaqiijinta diidmada hore ee gargaarka maaliyadeed, ogeysiis qoran ayaa loo dirayaa Cidda Mas'uulka ah. Haddii go'aaminta asalka ah la diido, waraaq abaalmarin ayaa la bixinayaa.

4. **Dhicitaan:** Marka laga reebo sida lagu tilmaamay Qaybta I.I., gargaarka maaliyadeed wuxuu dhacayaa waqtiga ugu horreeya ee mid kasta ee soo socda:

a) Hal (1) sanno laga bilaabo taariikhda codsiga;
b) Haddii gargaarka maaliyadeed lagu abaalmariyay kaliya adeeg caafimaad oo halmar la ansixiyey, marka la dhammeystiro adeegga noocaas ee halka mar ah;
c) Marka la bixiyo ogeysiiska isbeddelka xaaladaha maaliyadeed ee Cidda Mas'uulka ah ama awoodda lagu bixinayo ee lagu caawinayo Cidda Mas'uulka ah ee aan u-qalmin gargaar iyada oo la hoostagayo Siyaasaddan; ama
d) Marka la bixiyo ogeysiiska isbeddelka ee u-qalmitaanka Cidda Mas'uulka ah in uu ka qaybgalo Barnaamijyada La Heli Karo ee haddii kale saameynaysa u-qalmitaanka Cidda Mas'uulka ah si uu u helo gargaar maaliyadeed.

Codsiyada cusub ee gargaarka maaliyadeed, abaalmarin kasta waxaa loo fidinayaa dhammaan xisaabaadka jira waqtiga codsiga iyo dhammaan xisaabaadka la abuuray xilliga sannadka kadib taariikhda codsiga. Codsi cusub ayaa loo baahanayaa marka gargaarka maaliyadeed uu dhaco.

Haddii bukaanka hore loogu ansixiyey heerka qiime-dhimista gargaarka maaliyadeed ee gaarka ah ee sannadkii hore ka hor baaqiga xisaabta, iyo baaqiga harsan ee la filayo loo sii qaado sannad ansixin gargaar maaliyadeed oo cusub, heerka qiime-dhimista ee hore loo ansixiyey ee baaqiga sannadka hore waa in uu u dhaqangalaa baaqiga noocaas ah. Heerka qiime-dhimista ee loo ansixiyey sannadka soo socda waa in loo adeegsado kaliya adeegyada u-qalma ee la bixiyey inta lagu guda jiray sannadka soo socda ee noocaas ah.

5. **Been-sheegidyada Cidda Mas'uulka ah:** Haddii Cusbitaalka uu ka warqabo been kasta oo laga sheego xaqiiqda sida in Cidda Mas'uulka ahi aysan u-qalmin gargaarka maaliyadeed iyada oo la eegayo Siyaasaddan, abaalmarinta gargaarka maaliyadeed ee u dhigma waa laga noqonayaa. Cidda Ka Mas'uulka ah waxaa lagala xisaabtamayaa dhammaan baaqiyada ka dhallanaya, ee ku khasban siyaasadda Qiime-dhimista iyo Ammaahda.

6. **Dadaalada Ururinta:** Gargaarka maaliyadeed waxaa lagu oggolaan karaa marxalad kasta ee wareegga dakhliga. Cusbitaalka kama qaybgalaya tallaabooyinka ururinta ee aan caadiga ahayn, sida hannaanada maxkamadda iyo tallaabooyinka kale ee ka baxsan soosaaridda bayaanka caadiga ah iyo dabagalka xisaabta, ka hor inta aan la sameyn dadaalo macquul ah oo lagu go'aaminayo haddii Cidda Mas'uulka ah uu u-qalmo gargaarka maaliyadeed. Xisaabaadka hore loogu aqoonsadey in ay yihiin deyn xun iyo/ama loo qoondeeyay hay'ad lacag ururin waxaa laga yaabaa in lagu sameeyo dib-u eegis hore loo fuliyey. Dib-u eegis ayaa la sameyn karaa si loo tixgeliyo xaqiiqooyinka xiga waxaana la adeegsan karaa qaabaynta la saadaalin karo si loo go'aamiyo haddii xisaabaadka noocaas ahi ay ka soo baxeen tilmaamaha gargaarka maaliyadeed iyo, haddii ay sidaa tahay, in dib loogu kala qaybiyo xisaabaadka noocas ah deyn xun ilaa gargaar maaliyadeed. Marka la gaaro go'aaminta ugu dambeysa ee u-qalmitaanka, haddii bukaanka uu leeyahay qadar kasta oo la sugayo, dadaalo la sameynayaa iyada oo la raacayo siyaasadda lacag ururinta cusbitaalka si loo ururiyo deynta. Tallaabooyinka noocaas ah waxaa ka mid ah gelinta qorsheyaal lacag-bixin, iyo/ama u gudbinta deynta hay'ad lacag ururin dibadda ama gudaha ah. Cusbitaalka wuxuu yeelanayaa xuquuqda uu ku sameynayo waydiinta ilo dibadda ah, sida hay'adaha deynta, si uu u helo macluumaad ku saabsan weynaanta qoyska, dakhliga, iyo buundooyinka ammaahda ee Cidda Mas'uulla ah si uu u qiimeeyo dadaalka lacag-bixinta. Haddii weydiimaha noocaas ah ay tilmaamaan in aasaaska u-qalmitaanka samafalka loo qaateenka ah laga soo baxo sida lagu tilmaamey I.I, baaqiga xisaabta ee harsan ee bilaabay waydiinta waxaa loo qaybinayaa sida daryeel samafal.

Cidda Mas'uulka ah wuxuu sii wadayaa in uu helo bayaano inta lagu guda jiro tixgelinta codsiga dhammeystiran. Xisaabaad kasta ee Cidda Mas'uulka ee Noocaas ah waxaa loo gudbinayaa hay'ad lacag ururin (gudaha ama dibadda) ilaa go'aamin laga sameeyo. Booqasho ayaa loo wareejin karaa waaxda lacag ururinada 'gudaha Cusbitaalka haddii qofka oggolaanaya uu helay 3 bayaano ama in ka badan oo baaqigana aanan loo bixin si buuxda ama lasameeyo qorshe lacag-bixin bil kasta ah. Haddii xisaab hore loogu sii meeleeyay xaal deyn xun, dadaalada lacag ururinta waa la baajinayaa ilaa go'aamin laga gaaro. Haddii ay dhacdo in Cidda Mas'uulka ay bixiso dhammaan ama qayb ka mid ah Mas'uuliyadiisa/ Mas'uuliyadeeda Maaliyadeed ee Adeegyada U-qalma oo marka dambena loo arko in uu u-qalmo gargaarka maaliyadeed ee adeegyada noocaas ah, lacag-bixinada dib ayaa loo bixinayaa iyada oo lagu saleynayo tilmaamaha lagu dejiyey siyaasadda Aqoonsashada iyo Xallinta Baaqiyada Ammaahda.

7. **Qabanqaabada Lacag-bixinta:** Kadib marka isku-aaddinta gargaarka maaliyadeed la gaaro, baaqi kasta ee harsan waxaa loola dhaqmayaa si waafaqsan habdhaqanada lacag ururinta Cusbitaalka ee caadiga ah. Qabanqaabada lacag-bixinta waa la heli karaa waxaana lagu dhiirrigelinayaa kuwa aanan si buuxda u bixin karin baaqiyadooda harsan. Qabanqaabada lacag-bixinta waxaa la sameeyaa iyada oo loo marayo Adeegyada Maaliyadeed ee Bukaanka waana in ay waafaqsanaadaan Siyaasadda Qiimo-dhimista iyo Ammaahda ee Cusbitaalka.

D. **Takoor la'aan:** Iyada oo la raacayo sharciga la adeegsan karo, go'aaminta gargaarka maaliyadeed waxaa la sameeyaa iyada oo aan la tixgelin isirka, jinsiga, caqiidada, qowmiyadda, diinta, aqoonsiga jinsiga, dookha galmo, ama xaalka kale ee la ilaaliyo ee codsadeyaasha.

Iyada oo la eegayo Daaweynta Caafimaadka ee Degdegga ah iyo Xeerka Shaqaalaha ee Firfircoon (EMTALA), Cusbitaalka wuxuu, takoor la'aan iyo gudaha awoodihiisa gaarka ah ee xarun kasta u hoggaansanyihiin EMTALA, baaritaan iyo xassilinta xaaladaha caafimaadka degdega ah iyada oo aan la eegayn soo bandhigidda u-qalmitaanka gargaarka maaliyadeed ee shaqsiga.

E. **Qarashaadka Kukooban Bukaanada Xaqa:** Ayadoo laraacaayo go'aan kagaarista in bukaanku xaq uleeyahay iyo in kale caawimaada dhaqaale ee heshiiskaan kujirta, shuruudaha sooscda ee quseeya lacagta laga qaadaayo bukaanada noocaas ah ee xaqa uleh ayaa:

i. Cadadka Qarashka Guud ee Lasoo dalacaayo.

1. Markay jiraan *xaalad degdeg ah ama daryeelada kale ee caafimaad ahaan muhiimka ah*, bukaanka xaqa uleh caawimaada laguma qoran karo qarash kabadan cadadka guud ee ("AGB") ee laga qaado bukaanada caymiska kujira. Ayadoo laga raacaayo ujeedooyinka qarashaadkaan kaxidan, bukaanka waxaa kalilya " laga qaadi" karaa cadadka lacageed ee laga rabo inuu bixiyo, kadib marka laxisaabsho dhamaan qarashaadka laga jaraayo, qiima dhimisyada iyo qiimaha caymiska. hsaale ahaan, Hadii bukaanku xaq uyeesho caawimaad dhaqaale ayadoo laraacaayo heshiiskaan kaasoo leh caymis caafimaad, isbitaalka ayaa buuxinaaya shuruudaha looga baahanyahay hadii qofkaasi uusan shaqsiyan masuul ka ahayn dhiibista qarashaadka (tusaale, uu kubixinaayo qaabka qarash bixin wadaredka ah, caymis wadareed iyo qarash dhimis) wax kabadan cadadka AGB kadib marka dhamaan shuruudaha caymiska caafimaadka lawaafajiyay, xataa hadii cadka guud ee uu qofkaas

iyo shirkadiisa caymisku bixiyeen ay kabadan tahay cadadka qarashaadka AGB.

2. Isbitaalku wuxuu kuxisaabiyaa qarashka AGB asagoo adeegsanaaya qaabka "dib uxisaabinta" si loogo'aamiyo qiima dhimista loo samaynaayo bukaanada helaaya caawimaada dhaqaale.
3. Lifaaqa C Ayaa macluumaad dheeri ah kabixinaaya qaabka AGB ushaqayso.

ii. Qarashaadka Guud. Lacala hadii dhamaan adeegyada caafimaad ee **kale** lagu bixiyo heshiiskaan In the case (tusaale. Daryeelka aan ahayn mid degdeg ah ama kuwa kale ee muhiimka ah, iyo daryeelka aan lagu daboolin lifaaqa A ee heshiiskaancare), bukaanka xaqa uleh caawimaada waxaa laga qaadayaa qarash kayar cadadka qarashaadka guud ee daryeelka noocaas ah. "Qarashaadka Guud" waxaa laga wadaa qiimaha buuxa, ee udagsan Isbitaalka daryeelada uubixiyo si guudna looga qaado dhamaan bukaanada kahor intaan qiima dhims laga wadahadlay loosamayn, qiima dhims ama qarashaad laga jarin.

F. **Ogeysiis:** Cusbitaalka wuxuu shaacinayaa macluumaadka khuseeya barnaamijka gargaarka maaliyadeed, oo ay ka mid yihiin macluumaadka xiriirka ee La-taliyeyaasha Maaliyadeed si ay ugu caawiyaan hannaanka codsiga. Codsiga gargaarka maaliyadeed, siyaasadda gargaarka maaliyadeed, iyo soo-koobidda luuqadda waadaxa ah ee gargaarka maaliyadeed waxaa lagu heli doonaa Ingiriis Isbaanish, Carabi, Soomaali, Fiitnaamees, iyo Burmees. Adeegyada turjumaanka waxaa loo heli karaa baahiyada kale ee luuqadeed. Ugu yaraan, macluumaadka waxaa loo bixinayaa sida soo socota:

- Bukaan-jiifka, bukaan-socadka iyo deegaamada diiwaangelinta waaxda xaaladaha degdega ah
- Diiwaangelinta-hore iyo mareegtooyinka Adeegyada Maaliyadeed ee Bukaanka
- Farriimaha ku saabsan bayaanada dammaanad qaadaha ee la adeegsan karo
- Buuggyaraha dammaanad qaadaha Adeegyada Maaliyadeed ee Bukaanka
- Buuggaagta daryeelaha guriga waxaa lagu suurtagaliyey qololka bukaan-jiifka
- Wada sheekaysiga la-talinta maaliyadeed ee bukaanada/ dammaanad qaadaha ee ay sameeyeeen la-taliyeyaasha maaliyadeed ama Shaqaalaha Adeegyada Maaliyadeed ee Bukaanka oo si gaar ah loo tababarey

G. **Bixiyeyaasha U-qalma:** Addendum A waxay dhigaysaa liiska kooxaha bixiyeyaasha ee Cusbitaalka ka bixiya daryeelka xaaladda degdega ah ama daryeelka caafimaad ahaan loo baahan yahay ee xarumaha Cusbitaalka ee uu caymiyo gargaarka maaliyadeed sidoo kale qoridda liiska bixiyeyaasha ee matalaya adeegyada Cusbitaalka balse adeegyadooda UMA qalma caynsanaanta gargaarka maaliyadeed. Liiskan waxaa lagu heli karaa waqti kasta lacag la'aan, Online-ka iyo isaga oo waraaq ah, marka la codsado.

QEEXITAANNO:

Mas'uuliyad Maaliyadeed: Qaddarada ee ay bukaanada ama dammaanad qaadayaasha ay mas'uulka ka yihiin adeegyada daryeelka caafimaadka ee uu ku soo sheegtay Cusbitaalka, oo ay ka mid yihiin qaddarada uu dhakhtarka ku soo dalaco dhakhaatiirta shaqeysa ama dhakhaatiirta qandaraaska lala soo galey ee dib-ugu qoondeeyay lacag-bixinta Cusbitaalka.

La-taliyeyaasha Maaliyadeed: Shaqaalaha cusbitaalka ee sameeya shaqooyinka La-taliyeyaasha Maaliyadeed ee lagu qoray Siyaasaddan.

Maaliyad Ahaan Aan Awoodin: Shaqsiyaadka uu Cusbitaalka go'aamiyey in aysan awoodin in ay bixiyaan biilkooda caafimaadka iyada oo sabab u ah in Dakhliga Qoyskooda uu ka hooseeyo halka la rabo in uu ka bato, sida lagu tilmaamay siyaasaddan, oo ku saleysan Tilmaamaha Saboolnimada.

Dakhliga Qoyska: Isugeynta wadarta dakhliga guud ee sannadka ee Dhinaca/Dhinacyada Mas'uulka ah ee deggan isla hal guri. Iyada oo lagu sameynayo qeexitaannada uu adeegsado Xafiiska Tirakoobka Mareykanka, kani waxaa ka mid ah kasbashooyinka, magdhowga shaqo la'aanta, magdhowga shaqaalaha, Dammaanada Bulshada, Dakhliga Dammaanada ee Dheeraadka ah, lacag-bixinada gargaarka dadweynaha, lacag-bixinada dagaal yahanada hore, dheefaha dadka badbaaday, kasbashada laga helay lacagaha hawlgabka la siiyo ama qorshaha hawlgalka, dulsaar, faa'iido, kiro, lacagta la siiyo qofka batantiga iska leh, dakhli laga helo dhaxalka, ammaanado, gargaarka maaliyadeed, lacagta xaaska la furey la siiyo, taakulaynta ilmaha, gargaarka laga helo bannaanka guriga, iyo dhammaan ilaha kale. Dakhliga waxaa lagu cabbiraaa si ku saleysan canshuur horteeda kana mid ma ah faa'iidada raasumaalka ee aan la garan iyo khasaaraha ama dheefaha aan kaashka ahayn, sida kaarka raashiinka (*food stamps*) iyo kaalmooyinka guryaynta.

Caafimaad Ahaan Aan Awoodin: Shaqsiyaadka uu Cusbitaalka go'aamiyey in aysan awoodin in ay bixiyaan qaar ama dhammaan biilashooda caafimaadka sababta oo ah biilasha noocaas ah waxay dhaafsiisan yihiin boqolleeyo qaar ee Dakhliga Qoyskooda inkasta oo dakhligooda uu haddii kale ka badan lahaa shuruudaha u-qalmitaanka ee shaqsiyaadka noocaas ah in loo tixgeliyo in ay Maaliyad Ahaan Aan Awoodin.

Hantida Maaliyadeed: Qiimaha saafiga ah (iyada oo la tixgelinayo lacag ujro madaxfurasho kasta ama ciqaabaha kale ee la adeegsan karo) ee kaashka, iyo dhammaan hantida loo beddeli karo kaashka, oo ka mid ah balse aan ku koobnayn xisaabaadka kaydka iyo jeegga, shahaadooyinka dhigaalka, damaannadaha maalgashiga, lacago xaddidan oo qof la siiyo, xuquuqaha mustaqbalka ee lacag-bixinada, iyo siyaasadaha caymiska.

Tilmaamaha Saboolnimada: Tilmaamaha saboolnimada ee lagu cusboonaysiiyey sannad kasta Diiwaanka Federaalka ee Waaxda Mareykanka ee Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha iyada oo la hoostagayo awoodda 42 U.S.C. 902(2).

Adeegyada Xirfadlaha iyo Baahi Caafimaad: Adeegyada Xirfadlaha waxaa ka mid ah: (a) dhammaan xirfadda caafimaad ahaan loo baahan yahay, fududeynta, iyo adeegyada la xiriira ee lagu helo goob Cusbitaal kasta iyo (b) dhammaan adeegyada xirfadeed ee caafimaad ahaan loo baahan yahay ee uu bixiyo biilkana uu ku soo sheegto Cusbitaal meelo aan ahayn Cusbitaalka. Adeegyada caafimaad ahaanta loo baahan yahay waxaa ka mid ah kuwa baara, saxa, ama ka hortaga xaaladaha halista gelinaya noloshaada, iyo/ama horseedaya xanuun ama xaalad/jirro horumarsan.

Baahi caafimaad waxaa loo arkaa sida bixiyaha Cusbitaalka. Xaaladaha muranka keenna, baahi caafimaad waxaa go'aamiya Guddoomiyaha Waaxda ee bixiyaha ama Agaasimaha Caafimaadka ee Fulinta ee Cusbitaalka, sida loogu arko in loo baahan yahay iyada oo la hoostagayo duruufaha jira. Cusbitaalka ma bixiyo gargaarka maaliyadeed ee adeegyada qaar oo ay ka mid yihiin, balse aan ku koobnayn, kuwa lagu muujiyey Lifaaqa A.

Dhinaca/Cidda Mas'uulka ah: Bukaanka ama waalidiinta bukaanka (dhalid ama korsasho), waalidiinta ah adeerka ama eedada, mas'uulka sharciga ah ama shaqsiga kale ee sharci ahaan mas'uul ka ah lacag-bixinada Cusbitaalka ee adeegyada daryeelka caafimaad ee la siiyo bukaanka.

CODSIYADA KA WEECASHADA SIYAASADDA: Codsiyada ka weecashada siyaasadan waxaa lagu wajahayaa Maalgeliyaha Golaha Maamulka ee siyaasaddan.

SIYAASADAHA LA XIRIIRA:
Daaweynta La Xusho ee Siyaasadda Bukaanada Da'da yar ee aan Muwaadiniinta Ahayn
Shuruudaha Maaliyadeed ee Siyaasadda Unug Tallaalidda
Siyaasadda Qiimo-dhimista iyo Amaahda
Siyaasadda Haynta Diiwaanada iyo Maareynta
Aqoonsashada iyo Xallinta Baaqiyada Amaahda

FOOMAMKA LA XIRIIRA:
8241-072 MR 05/16 Codsiga Gargaarka Maaliyadeed
8071-353 MR Soo-koobidda Luuqadda Waadaxa ah ee Gargaarka Maaliyadeed (PLS)
Shuruudaha Maaliyadeed ee Unug Tallaalidda – Lifaaqa A

TIXRAACYADA:
Tilmaamaha Saboolnimada oo si xilliyo ah loogu cusboonaysiiyo Diiwaanka Federaalka ee Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha ee Mareykanka iyada oo la hoostagayo awoodda 42 U.S.C. 9902(2)

XEER-HOOSAADYADA:
Xeerka Ilaalinta Bukaanka iyo Daryeelka La Awooddi Karo, Qaybta 9007: Shuruudaha Dheeraadka ah ee Cusbitaalada Samafalka (Sharciga Guud 111-148) 26 C.F.R. 501®

*Xeerka Ka-warbixinta Ururinnada Cadaaladda ah (FCRA): Qaybta Isticmaalka la Oggol yahay ee 604. 15 U.S.C. 1681b (bogga 10)

RAADINTA EREYGA MUHIIMKA AH:
Daryeelka samafalka, gargaarka maaliyadeed, samafal, maaliyadeed, qaansheeg, diiwaangelinno, la-talin maaliyaded, canshuur-ka-reebid, gargaar, gargaar lacag-bixin, qaansheeg/biil, u-qalmitaanka loo qaateenka ah, gargaarka maaliyadeed ee loo qaateenka ah, gelida bukaanka

MILKIILAHA WAX AY KA KOOBANTO SIYAASADDA:
Amy Crawford, MHSA, Agaasimaha Gelida Bukaanka

MAALGELIYAHA GOLAHA MAAMULKA:
Jennifer Kingry, Madaxweyne Ku-xigeenka, Maaliyada

WAXAA DIB-U EEGAY:
Madaxwayne Kuxigeenka, Maaliyada
Madaxwayne Kuxigeenka, Lacag Arurinta
Madaxwayne Kuxigeenka, Xisaabinta iyo hanti dhawrka
EVP/CFO

MUDDADA DIB-U EEGIDDA:
3 sano

DIB-U EEGIDDA IYO OGGOLAANSHAHA GUDDIGA:
Gudigga aawimaada Dhaqaale

OGGOLAANSHAHA UGU DAMBEEYA:

_____

Randall L. O'Donnell, Ph.D. Taariikh
Madaxa iyo Sarkaalka Madaxa ka ah Fulinta

OGGOLAANSHAHA GUDDIGA:

_____

Debbie Sosland-Edelman. Taariikh
Guddoomiyaha Guddiga Agaasimeyaasha Carruurta Mercy (Children's Mercy)

Lifaaqa A

Adeegyada Aan U-qalmin Gargaarka Maaliyadeed*

- Lacagaha uu ku soo dalacay xubin ka tirsan shaqaalaha caafimaadka si toos ah Cidda Mas'uulka ah (oo loola jeedo, lacagaha si toos ah uma sheegto Cusbitaalka)

- Adeegyo kasta oo lagu sameeyo kaash oo ay ka mid yihiin balse aan ku koobnayn kuwan soo socda:
    - Dammaanadaha indhaha
    - Muraayadaha indhaha lagu dhejiyo ee qurxinta ah
    - Qalfoofka muraayadaha sixitaanka ee ka baxsan nakhshadda qorshaha dheef kasta

- Habraacyada la xusho oo ay ka mid yihiin balse aan ku koobnayn kuwan soo socda:
    - Qaliinka isqurxinta
    - Baaritaanka hido-wadeyaasha oo uu codsadey waalid(iin) balse aan loo baahnayn si loogu xaqiijiyo oggaanshaha cudurka ilmaha ama loogu baahan yahay qorshaha daaweynta ilmaha

- Adeegyada aan caafimaadka ahayn sida adeegyada bulshada, waxbarashada ama xirfadda

* Ka-reebnaanta kiiska waxaa dib loogu eegayaa rafcaano ahaan Guddiga dignoonaanta

Lifaaqa B

Guddiga Gargaarka Maaliyadeed
Xubinnimada iyo Mas'uuliyadaha

Guddiga Gargaarka Maaliyadeed ("Guddiga") wuxuu dib-u eegayaa duruufaha gaarka ah ama xun ee ku hareersan codsiyada gargaarka maaliyadeed ee ka baxsan xudduudaha Siyaasadda, oo ay ka mid yihiin balse aan ku koobnayn qoysaska Caafimaad Ahaan Aan Awoodin ee ka sarreeya tilmaamaha dakhliga ee gargaarka maaliyadeed iyo kuwa ka baxsan degaanka codsiyada ee gargaarka. Guddiga wuxuu sidoo kale ka hadlayaa rafcaano kasta ee la helay ee la xiriira diidmada la sameeyay iyada oo la eegayo Siyaasadda.

Abaalmarinada ay sameeyaan Guddiga waxay noqon doontaa heer lacag bixin gooni ah oo gaaraya 100% ee gargaarka maaliyadeed. Aayadoo waafaqsan qaybta III. E. ee *Siyaasada Caawimaada Dhaqaale ee Isbitaalka* Children's Mercy Hospital. Liis-hubineedka waxaa loo adeegsanayaa in lagu cabbiro qaddarka u-qalmitaanka Cidda Mas'uulka ah kaalmada/gargaarkamaaliyadeed.

Abaalmarinada waxaa loo bixin karaa si ku saleysan hal mar, iyada oo meesha laga saarayo deyn xun, ama loo ansixiyey booqashooyinka mustaqbalka ilaa iyo muddo waqti hal sanno ah.

Guddiga waxaa hoggaaminaya Madax Ku-xigeenka ee Wareegga Dakhliga, ama qofka ay magacaabeen, waana ugu yaraan in ay ka mid noqdaan matilaad ka socda meelahan soo socda:

- Hoggaanka La-talinta Maaliyadeed ee Gelida Bukaanka
- Wareegga Dakhliga (xubin coddaynaya)
- Adeecidda (xubin coddaynaya)
- Adeegyada Daryeelka Bukaanka (xubno coddaynaya)
- Shaqaale Caafimaad (xubno coddaynaya)
- U-doodaha Bukaanka (xubin coddaynaya)
- Shaqo Bulsho (xubin coddaynaya)
- Daryeelka Ku Dhisan Qoyska (xubin coddaynaya)
- Sinnaanta iyo Kala Duwanaanta (xubin coddaynaya)

La-taliyeyaasha Maaliyadeed ee waaxda Gelida Bukaanka waxay siinayaan macluumaad Guddiga waqti ka horeeyaa kullamada jadwaleysan balse kama qaybgalayo fadhiyada falanqeynta Guddiga.

Kulamada waxay u dhacayaan si joogto ah oo aan ka yareyn si bil kasta mar ah. tirada ugu yar ee ee kasoo qayb gasha shirka ayaa loo baahan yahay si loo qabto shaqada oo qoraalada kulanka loo suurtagaliyo. Xubnaha Guddiga waxaa laga filayaa in ay sheegaan iskhilaaf dano kasta oo suurtagal ah oo leh Codsiga iyo in uu ka cudurdaarto/cudurdaarato dooda iyo fadhiga falanqeynta.

Guddoomiyaha Guddiga (ama in laga ergeyo ka maqnaanshihiisa kulan) iyo wakiil Guddi kale waa in u saxiixo Codsi kasta ama Liisto-hubineedka si loo diiwaangeliyo oggolaanshaha Guddiga.

Lifaaqa C:

Habka Kharashka Guud ahaan Lagu Soo Dalaco (AGB)

Bukaanada helaya gargaarka maaliyadeed ee adeegyada caafimaad ahaan ama xaalad degdeg ahaan loo baahan yahay laguma dalacayo in ka badan Kharashka Guud ahaan Lagu Soo Dalaco (AGB) bukaanada caymisan. Kharashka lagu dalacayo Cidda Mas'uulka ah ee helaysa gargaarka maaliyadeed ee dhammaan daryeelka caafimaad kale kama badanayo lacagaha guud ee lagu soo dalacayo daryeelka noocaas ah.

Marka la joogo Children's Mercy, AGB waxaa la go'aamiyaa iyada oo loo marayo "habka dib-u eegidda" kaasi oo loo xisaabiyo sida soo socota:

- AGB waxaa la xisaabiyaa iyada oo dib loo eegayo *dhammaan* kharashka la oggolaadey ee sheegashooyinkii hore ee xarunta cusbitaalka ee daryeelka degdega ah iyo kuwa kale caafimaad ahaan loo baahan yahay ee lacagta-adeegga ee Medicare oo la socda sheegashooyinka dhammaan caymiyeyaasha caafimaadka gaarka loo leeyahay ee cusbitaalka ka hor muddada 12-bilood. Qaddarkan waxaa ka mid noqon kara caymiska la-wadaago; lacag-bixinada la-wadaago iyo ka jarisyada.
- AGB waxaa la go'aamiyaa iyada oo lagu dhufanayo lacagta lagu soo dalaco ee guud ee daryeelka degdega ah iyo kan caafimaad ahaan loobahanyahay hal ama boqolleeyo badan ee ah lacagaha lagu soo dalaco ee guud.
    - Cadadka kolkiiba ah waxaa lagu xisaabshaa ugu yaraan si sanadle ah ayadoo looqaybinaayo iskudarka qarashaadka gaarka ah ee hoos kucad, oo looqaybshay qarashaadka guud ee laxariira sheegashooyinkaas..
    - Koreeyaha boqolayda AGB wuxuu udhigmaa cadaka guud ee dhamaan qarashaadka daryeelka degdega ah iyo adeegyada kale ee caafimaad ahaan muhiimka ah kuwaasoo ay ogolaatay haayada Medicare ee daryeelka lacag la'aanta ah iyo dhamaan shirkadaha caymiska caafimaadka ee gaarka looleeyahay kuwaasoo qarashaadka siiya adeegyada isbitaalka [ama shirkadaha kale] inta lagu jiro mudo 12 bilood ah. Hadii qarashka loo adeegsado xisaabinta qarashaadka ee isbitaalka the Children's Mercy cadadka guud ee dadka laga qaado boqolkiiba AGB waxay kuxirantahay hadii qarashka ay ogolaatay shirkada caymiska inta lagu jiray mudada 12 bilood ah ee xisaabta lagu saleeyay, lagumana salaynaayo hadii daryeelka qarashaadka lagu yeeshay ee labixiyay ee mudada 12 bilood ah.
    - Hooseeyaha AGB ee boqolkiba wuxuu udhigmaa cadadka guud ee qarashaadka laxariira lacagta guud ee isbitaalku qaado.
- Boqolleyda waxaa lagu dabakhaa 120ka maalin kadib dhammaadka muddada 12-bilood ee Children's Mercy u adeegsadey xisaabinta boqolleyda AGB.

AGB-ga Children's Mercy waxaa loo xisaabiyay, sida kor lagu sharaxay, taas oo ku salaysan dhamaan dalabyada Children's Mercy ee caymisku ogol yahay laga bilaabo Maarso 28, 2018 ilaa Febraayo 28, 2019. Natiijada boqolkiiba ee AGB waxay ahayd 57.08%. Natiijada inta ugu yar ee la ogol yahay ee qiima dhimista halkii sharci ee FAP IRS 501(r) ee u dhaxeeya mudada Juun 28, 2019 ilaa Juun 27, 2020 waa 42.92% (1 laga jaray AGB oo ah 57.08%).

Isbitaalka Children's Mercy waxa uu go'aansaday inuu yeesho mid ka badan (taas oo ay door bidayaan macaamiishu) qiimo dhimis FAP oo 52.00% kayar taas oo ka kooban qiimo dhimisihii sanadkii hore.

Iyada oo lagu saleynayo habka dib-u eegidda ee xagga sare lagu sharxey, boqolleyda AGB ee mudada Juun 28, 2019 ilaa Juun 27, 2020 waa :

- **AGB-ga Cusbitaalka Children's Mercy** **57.08%**
- Qiimo dhimista FAP ee Ugu Yare ee Loo Baahan Yahay (1 laga jaray AGB) 42.92%
- Qiimo Dhimista FAP ee Ay Qaadatay Children's Mercy 52.00%

Su'aalaha khuseeya boqolleyda AGB iyo xisaabinta waa in lagu hagaajiyo Adeegyada Maaliyadeed ee Bukaanka, Waaxda Adeegga Macmiilka. Waaxda Adeegga Macmiilka ee PFS waxaa laga heli karaa Isniin-Jimco laga bilaabo 7:30subaxnimo-5:00galabnimo CST lambarka telefoonkan (816)701-5100.